

## Fayruska koronaha iyo uurka

Coronavirus Fayruska koronaha waxaa baadhitaano badan lagu ogaaday in uu marar badan dumarka uurka leh ku keeno cudurka noociisa culus. Baahida daryeelka isbitaalka iyo daryeelka degdegga ah halista uu qofku u galayo ayaa siyaadaysa. In wakhtigooda kahor ay dhalaan ama lagu qalo way kaga badanyihiin dumarka anan lahayn cudurka fayruska koronaha.

Fayruska koronuhu wuu is badbadalaa marar badan wayna adagtahay sida la iskaga difaaco nooca fayruska ee cusub haddii uunan qofku qaadanin tallaalka fayruska koronaha.

Finland waxaa lagu isticmaalaa tallaalka mRNA. Tallaalka noocisaas waa mid badbaado ah wakhtiga uurka. Tallaalkaas laguma arkin wax dhibaato ah in uu uurka ku keeno ama ilmaha uurka ku jira. Bil cagsi: marka ay labo toddobaad kasoo wareegto tallaalkii u horreeyay waxaa la arkay in dhallaanku xitaa uu leeyahay difaac fayruska koronaha ah. Hooyada tallaalka sidoo kale wuu difaacayaa dhallaanka. Tallaalku si buuxda ugama difaacayo fayruska koronaha, laakiin wuxuu ka hortagayaa xanuunka noociisa culus.

Haay'adda caafimaadka iyo nololwanaagga (THL) iyo Ururka Caafimaadka ee Adduunka (WHO) waxaay ku talinayaan in tallaalka la qaato wakhtiga uurka.

Haddii anad wali qaadanin tallaalka koronaha, waxaan ku talinaynaa in aad qaadato sida ugu dhakhsaha badan. Qofka kaalmeeyaha ah xattaa waa u muhiim in uu tallaalka qaato.

Tallaalka waxaad ka helaysaa degmadaada.

**Macluumaad dheeraad ah waxaa laga helayaa tusaale ahaan bogaggan:**

[thl.fi](http://thl.fi) iyo [who.int](http://who.int)